

Maal siinta Farshaxanka ee Gollaha Fan Goboleedka ee Magaalada

Maal siinta Farshaxanka ee Gollaha Fan Goboleedka ee Magaalada (MRAC) waa urur aan macaash doon ahayn oo maamulka deeq siinta ururada iyo kooxaha bixiya fanka gudaha aaga metrooga 7 Degmo (Anoka, Carver, Dakota, Hennepin, Ramsey, Scott, degmooyinka Washington) iyo farshaxamiinta ku nool aagan.

Sanadkii u dambeeyaya MRAC waxay siisay in ka badan 600 oo deeqo ah kooxaha iyo dadka farshaxanka ah ee asalo kala duwan ka soo jeeda. Dadka deeqda la siinayo waxaa ka mid ah kooxo aan lahayn taariikhda barnaamijka ah oo ma jiraan shaqaale mushahar qaata, hay'adaha aan macaash doonka ahayn ee waawayn ee leh barnaamijka fanka yaryar, iyo fanka iyo dhaqanka aan macaash doonka ahayn oo leh xubno shaqaale dhowr ah iyo barnaamijka sanadka oo dhan.

Waxaa jira saddex barnaamijyo oo deeq ah oo laga heli karo MRAC xisaab xidheedka sanadka 2021 (Juulay 1, 2020- Juun 30, 2021).

- **Jawaabta Sinnaanta Deeqda** waxay siisaa abaal marin ah ilaa \$2500 kooxaha ama ururada ay hogaamiyaan badanka Dadka madow, Dadka asalka ah, Danka aanan cadaanka ahayn (BIPOC), Dadka Naafada ah (PWD), iyo/ama Khaniisad, Khaniis, Labba sinjiile, Qofka sinjigiisa beddela, Dadka aan sinji caadi ah lahayn, Labbeeb, Aan galmada dareemin/Qof aan sinji gaar ah lahayn, Labba noocle (LGBTQIA2+) shakhsiyaadka ah. Deeqahan waxaa loo heli karaa kooxaha ugu yaraan 3 qof gudaha hogaanka. Mashaariicda deeqahan lacageed waxaa lagu isticmaali karaa qaabab kala duwan, laakiin waxay u baahan yihiin inay bixiyaan gelidda fanka kuwan gudaha aaga metrooga 7 degmo.
- **Taageerada Deeqda Dabacsan** waxay abaal marin ku siisaa ilaa \$15,000 kooxaha ama ururada ugu yaraan 3 qof oo hogaanka ah. Mashaariicda deeqahan lacageed waxaa lagu isticmaali karaa qaabab kala duwan, laakiin waxay u baahan yihiin inay bixiyaan gelidda fanka kuwan gudaha aaga metrooga 7 degmo.
- **Maaliyada Tallaabada Labbaad** abaal marinta ilaa \$5000 khabiiirada farshaxanta ee lagu siinayo maaliyada si loo caawiyo horumarinta mihnadooda shaqo. Farshaxanka waxay u baahan yihiin ugu yaraan 18 sanadood jirka iyo in uu deganyahay aaga metrooga 7 degmo ugu yaraan ilaa lix bilood ka hor muddada la qabtay. Dadka farshaxanka ee helaya ku celcelinta Maaliyada Tallaabada Labbaad gudaha kala duwanaanshaha anshaxyada farshaxanka.

Dhammaan abaal marinta deeqaha ee MRAC, waxaa lagu sameeyaa nidaamka dib u eegida guddida halka xubnaha fanka bulshaddu ay akhriyaan oo ay qiimeeyaan codsiyada heerka qiimaynta la muujiyay.

Hagitaanada deeqda, faahfaahinta ku saabsan u qalmida, taariikhda loo qabtay iyo codsiga waxaa la soo geliyaa websaydka www.mrac.org.

Taageerada dheeraadka ah, Maamulayaasha Barnaamijka MRAC waxaa loo heli karaa si looga hadlo fikradaha mashruuca iyo u qalmida ama ka jawaabida su'aalo kasta. Haddii aad u baahan tahay qoraalada turjuman ama aad qabto wax baahiyaha helid ah, MRAC waxay ku farax san yihiin inay bixiyaan habbayntan ogaysiis hal todobaad ah. Fadlan nagala soo xidhiidh mrac@mrac.org.